Afka Iswiidhishka loogu talo galay dadka muhaajiriinta ah (SFI)

SFI waa Af Iswiidhishka dadka bilowga ah. Waxaad barataa Luqadda Iswiidhiska oo aad barataa sida loo akhriyo, qoro oo loogu hadlo oo waxaad fahamtaa Afka Iswiidhishka. Qaadashada Koorso SFI waxay awood kuu siinaysaa in aad dareento in aad qayb ka tahay bulshadda Iswiidhan si degdega. Tani waxay kuu ogolaan doontaa in aad horumarto si aad u kordhiso waxbarashada ama hesho shaqo.

Waxaanu haynaa koorsooyin kala duwan oo SFi ah oo aad adigu kala dooranaysid, iyaddoo ku xidhan taariikhdaada hore iyo ujeedooyinkaaga. Koorsadayada SFI aday kugu koobatahay. Shuruudahaaga, kartiyahaaga iyo baahiyahaaga. Waxaad ku barataa socodka habka kugu habboon. Waanu wada shaqaynaa si aanu u qorshayno qorshe waxbarasho kaas oo adiga kuu gooni ah.

Ku saabsan koorsooyinka

Af Iswiidhiska muhaajiriinta, ama SFI, waa koorso loo qorsheeyay iyaddoo ku salaysan baahiyahaaga. Waxaa jira saddex kala duwan oo ah dhabbooyinka waxbarashada ee SFI. Waxaad qaadaa dhabbada waxbarashadda taas oo aad ugu habboon taariikhdaada hore ee waxbarasho iyo ujeedooyinka waxbarashadaada. Waxaad u shaqaysaa socodkaaga waafaqsan qorshaha waxbarashadaada shakhsiyeed.

Dhabbada barashada 1 (SFI koorsooyinka A iyo B)

Dadka leh mid xaddidan ama aan lahayn waxbarasho (0-5 sano) oo ka yimid wadankoodii hooyo, oo aan awood u lahayn ay wax ku qoraan ama ku akhriyaan iyo/ama dadka aan aqoon alifbeetadda Laatiinka ah.

Dhabbada barashada 2 (SFI koorsooyinka B iyo C)
Dadka leh waxbarasho hoose (6-9 sano) oo ka yimid wadankoodii hooyo.

Dhabbada barashada 3 (SFI koorsooyinka C iyo D)
Dadka leh mid la mid ah waxbarashada dugsiga sare ama ka saraysa (10 sano ama ka badan) oo ka yimid wadankoodii hooyo.

Koorsooyinkayaga SFI waxay la leeyihiin xidhiidho adag caalamka shaqada laga bilaabo marxalad hore, tusaale ahaan iyaddoo la marayoo tababaro shaqo. Markaad ku jirto tababar shaqo goob laga shaqeeyo oo Iswiidhan ah, waxay ku siisaa fursadda aad ugu hadasho in badan oo Af Iswiidhish ah oo waxaad ka heshaa aragtidda nolosha shaqo ee Af Iswiidhishka iyo dhaqanka. Waxaad xidhiidh la samayn kartaa loo shaqeeyaha oo aad yeelan kartaa fursadda aad ku miijinayso waxaad samayn karto.

Sidoo kale waxaanu ku siinaa agabka aad u baahntahay si aad u bilowdo raadinta shaqo. Waxaanu kugu caawinaa qoritaanka khibradaada shaqo iyo waraaqaha codsashada shaqada.

Eductus waxaad wax ku barataa xidhiidh dhow oo aad la leedahay macalimiinta iyo ardayda kale. Casharadu waxay bedelaan hadalada la jeedinayo, waxbarashada dijitaalka ah iyo waxbarashada gaarka ah. Waxaanu bixinaa koorsooyin maalinta gudaheeda iyo fiidkii – wakhtiyadu way kala duwanaaan karaan iyaddoo ku xidhan goobta iyo dugsiga. La xidhiidh xidhiidhkayaga goobtaada wixii xog dheeraada ah.

Waxaad ku dari kartaa koorsooyin SFI koorsooyin waxbarashada dadka waa wayn oo bilow ah, koorsooyinka waxbarashada dadka waa wayn ee dhexe, tababarka shaqada, shaqo ama shaqo kale.

Muxuu koorasku kuu hogaamiyaa?

Luqadda Iswiidhish waxa ay kuu furtaa adiga doorashooyin cusub iyo fursaddo! Qaadashada koorsada SFI waxay awood kuu siinaysaa adiga in aad dareento in aad si degdega qayb uga tahay bulshadda Iswiidhiska oo waxay kaa caawisaa in aad gasho suuqa shaqadda.

Yaa loogu talo galay koorsada?

SFI waxaa loogu talo galay dadka aan Af Iswiidhishku ahayn luqaddoodii koowaad, ku nool Iswiidhan oo ay ka maqan tahay xirfadaha hoose ee luqadda Iswiishishku. Laga yaabaa in aad ku cusub tahay Iswiidhan ama aad halkan ku noolayd dhowr sano oo aad u baahantahay in aad horumariso Af Iswiidhishkaaga. Waxaad baran kartaa koorso SFI laga bilaabo 1 Juulay sanadka aad gaadho da’da 16.

Yaan la xidhiidhaa haddaan rabo in aan bilaano koorso SFI ah?

La xidhiidh degmadda aad ku nooshahay oo codso koorso SFI. Degmadaadu waxay ka masuultahay hubinta in dadka xaq u leh SFI laga siiyo meel koorsada. Koorsadu waa in ay u bilaabantaa sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah. Casharadu waa in ay ku bilaabmaan saddex bilood gudahood, ilaa ay jiraan sababo gaar ah mooyee.

Aqoontee hore ayaan u baahanahay?

Uma baahnid wax aqoona oo hore.

Sababma ayaan u doortaa Eductus

- Koorsooyinkayaga SFI aday kugu koobanyihiin; shuruudahaaga, kartiyahaaga iyo baahiyahaaga.
- Waxaanu ku siinaa habka ugu degdega badan ee aad ugu wanaagsanaato Luqadda Iswiidhiska.
- Waxaad la xidhiidhi doontaa caalamka shaqada. Waxaa lagu siin doonaa caawimada qoritaanka khibradaada shaqo (CV) iyo waraaqaha codsashada shaqada ee codsiyada shaqada.
- Ujeedada koorsada SFI waa in aad adigu dareentid in aad qayb ka tahay bulshadda Iswiidhishka oo aad awood u yeelato in aad u taageerto naftaada lacag ahaan.

Cutubyada waxaa ka mid ah

Dhabbada waxbarasahda 1. Kooraska A. Summada kooraska SFIKUA9

Dhabbada waxbarasahda 1. Kooraska B. Summada kooraska SFIKUB9

Dhabbada waxbarasahda 2. Kooraska B. Summada kooraska SFIKUB9

Dhabbada waxbarasahda 2. Kooraska C. Summada kooraska SFIKUC9

Dhabbada waxbarasahda 3. Kooraska C. Summada kooraska SFIKUC9

Dhabbada waxbarasahda 3. Kooraska D. Summada kooraska SFIKUD9